REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DECM/249-1530/052009

DATE 26/05/09

# DECREETO MADAXWEYNE NO: 382 /052009

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Helay: Go'aanka GW, Go'aan NO: 440 ee ku suntan GW/KF-8/440/2009 ee 17/01/2009 iyo Go'aan GG, Go;aan NO: 04/kal-fadhiga 37aad/03/09 ee 03/03/2009 kaasi oo ay ku ansixiyeenXeerka Mamnuucidda Miinadda Ldka dadka ee Xeer Lambar 40/2009.

**Wuxuu Soo Saaray**

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka Mamnuucida Miinada Lidka Dadka ee Xeer Lr. 40/2009.

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweynaha JSL

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: GW/G/16/87/2009

Date : 05/05/09

Ku: Madaxweynaha JSL = Hargeysa =

**Ujeeddo: Soo gudbin go'aan ansixinta Xeerka Mamnuucida Miinada Lidka dadka X/Lr. 40/2009.**

*Mudane Madaxweyne,*

Waxa aan halkan kugu soo gudbinaya go'aanka ansixinta Xeerka Mamnuucida miinada lidka dadka iyo nuqulka xeerk kor ku xusan.

Allaa Mahad Leh

Maxamed Xasan Kaahin (Kayse)
Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Ref: GW/KF-8/440/2009

Date : 17/01/2

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Mamnuucida Miinada Lidka Dadka (Xeer LR.40/2009)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **38aad, faqradda 4aad xarafyada B&T** & Qodobada **39aad, 18aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. |
| MARKUU DERSAY: | Axdiga Caalamiga ah ee mamnuucida, isticmaalka, kaydsiga, soo saarida iyo gudbinta miinada lidka dadka. |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Ahmiyada way nee ay leedahay in la helo xeer lagaga hortago waxyeellada miinada iyo walxaha kale ee qarxa. |
| MARKUU KU QANCAY: | In nuxurka xeerkani xambaarsan yahay ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta iyo inuu kala qeexayo sidii loo kala sooci lahaa doorarka Hay'adaha ka shaqeeya miinada iyo waxyeeladeeda. |
| MARKUU U CODEEYEY: | Fadhigiisii **17/01/2009** oo ay goob joog ahaayeen (43) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada** |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(34 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Mamnuucida miinada Lidka Dadka Xeer **LR.40/2009**, halka ay ka diideen **(3)** Mudane, kana aamuseen **(5)** Mudane,**Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHADLEH**

**Maxamed Xassan Kaahin (Keyse)**
**Xog. Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi(Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAHA GUURTIDDA

REPUBLIC OF SOMALILAND
HOUSE OF ELDERS

Tell: 00 252 2 4426342
Tell: 00 252 2 4424917

Website: www.guurti.org
E-mail: contact@guurti.org

*Address: Main Street, Sha'ab Area, Near Presidential Palace, Guurti House*
*Hargeisa, Somaliland.*

*Ref: GG/JSL/* /GG/JSL/Go'aan 04/Kal-fadhiga 37aad/03/2009 *Date:* 03/03/2009

*=Hargeisa=*

**Ujeeddo: Ansixinta Mashruuca Xeerka Mamnuucidda Miinadda Lidka Dadka ee Xeer Lambar 40/2009.**

## GOLAHA GUURTIDDA JSL

| | |
|---|---|
| *Marku Arkay:* | Soo-jeedinta Guddigga Shuruucda iyo Garsoorka ee Golaha Guurtidda JSL, oo ahayd in la ansixiyo Mashruucaasi Xeer sida ay Golaha Wakiiladdu u soo gudbiyeen; |
| *Marku Arkay:* | Qoddobka 61aad ee Dastuurka Qaranka JSL, faqradiisa3aad. |
| *Markuu Arkay:* | Qoddobka 77aad ee Hab-raaca Xeer-dejinta |

### WUXU ANSIXIYAY

Mashruuca Xeerka Mamnuucidda Miinadda Lidka Dadka ee **Xeer Lambar 40/2009,** kuna ansixiyay sidii ay Golaha Wakiiladdu u soo gudbiyeen.

Codadka uu ku ansaxayna waa sidani, iyadda oo ay fadhiga Madasha ku sugnaayeen 47Mudane: -

| Ogol | Diidan | Aamus |
|---|---|---|
| 44 | 2 | 0 |

Guddoomiyuhuna ma u codayn sida uu yahay dhaqanku.

Sidaasi daraadcedna, Mashruuca Xeerkaasi oo halkani ku lifaaqan, wuxu ku ansaxay sidii uu kaga yimid Golaha Wakiiladda.

*Alla Mahad Leh*

*Suleymaan Maxamuud Aadan*
*Guddoomiyaha Golaha Guurtidda JSL*

*Cflaahi Ibraahim Habane*
*Xoghayaha Guud ee G/Guurtidda JSL*

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADA

**Xeerka Mamnuucidda Miinadda Lidka Dadka**

## XEER .NO.40/2009

## Golaha Wakiilladu:

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay :** | **Qodobada,38aad, 39aad, 17aad iyo 18aad Faqradiisa 2aad** Ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Markuu dersay :** | Axdiga Caalamiga ah ee mamnuucidda, isticmaalka, kaydsiga, soo saaridda iyo gudbinta Miinada lidka dadka(Axdiga Ottowa). |
| **Markuu Arkay :** | Go'aankii tirsigiisu ahaa **GW/KF-7/89/99 ee 01/03/1999**, kaas oo uu goluhu ku taageeray Axdiga Ottowa ee mamnuucidda isticmaalka, kaydsiga, soo saaridda iyo gudbinta Miinada lidka dadka. |
| **Markuu qaderiyey :** | Ahmiyada weyn ee ay leedahay in la helo xeer lagaga hortago Waxyeellada Miinada iyo walxaha kale ee qarxa. |
| **Marku ku qancay :** | In nuxurka xeerkani xambaarsan yahay ilaalinta xuquuqda nafeed, jidheed iyo maskaxeed ee muwaadiniinta JSL |

**WUXUU SOO SAARAY XEERKAN :**

ARKIFIYADA GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND

# QAYBTA 1AAD

# HORDHAC

# QODOBO GUUD

## *Qoddobka 1aad*

## *Micnaha Erray-bixinta*

- **Aaladda lidka addeegsiga:** Waxaa loola jeedaa aalad loogu talogalay in miinada lagu xafido oo ah qayb ka mid ah, ku dhegan ama miinada kaga xidhan xagga hoose, taas oo dhaqaajisa miinada marka cidi isku daydo in ay si lama filaan ah u farafarayso ama si kas ah ugu ciyaarto.
- **Miinada lidka dadka:** Waxaa loola jeedaa miinada si buuxda ugu qaraxda taabasho, ku joogsasho ama daaris oo ay ku jiraan walxaha kale ee dhagridda, carinta qaraxyada iyo miinada lidka gaadiidka ee saamayntaa oo kale leh, ha ku xidhnaato ama yaanay ku xidhnaan aaladda lidka addeegsigu, sidoo kale, qaybo ka mid ah miinada lidka dadka oo loo farsameeyay, loo bedelay ama laga dhigay hub u qarxa sida miinada lidka dadka ama miinada lidka gaadiidka ee ku qaraxda cadaadiska ama culayska dadka, waxa loo aqoonsan yahay miinada lidka dadka.
- **Miino:** Waxaa loola jeedaa walax qaraxda oo loogu talogalay in la dhigo dhulka hoostiisa ama meel korkiisa u dhaw ama meel kale oo bannaan, si ay ugu qaraxdo taabasho, cadaadis, ku joogsi, u dhowaansho, kulayl dad, xayawaan, gaadiid iwm.oo keenaya qarax kala firdhid waxyeelo jidheed ama nafeed sababi karo, loona adeegsado ujeeddo milateri.
- **Goob miinaysan:** Waxaa loo la jeedaa dhul halis u ah miino ku jirta ama loo tuhunsan yahay.
- **Axdiga:** Waxaa loo la jeedaa Axdiga (Convention) caalamiga ah ee mamnuucidda, isticmaalka,kaydsiga, Soo Saarida iyo Gudbinta Miinadda lidka dadka ee **18kii September 1997.**
- **Xafiiska**: waxaa loola jeedaa Xafiiska M/weyne ku-xigeenku ee hawlaha miinada una igman masuuliyadda xeerkan.
- **Warcejin:** waxaa loola jeeda in miinada laga qaado dhulka JSL laguna warcejiyo cid ilaalinteeda iyo haynteeda u xilsaaran oo aanay ku jirin dhulka miinadu ku duugan tahay.

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan Waxaa loogu yeedhayaa Xeerka mamnuucidda isticmaalka, kaydsiga, soo saarida iyo Gudbinta Miinooyinka lidka Dadka iyo burburintooda.

## Qoddobka 3aad
## Fasiraad

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Xeerarka kale ee Dalka, iyo Xeerarka Caalamiga ah .

## Qoddobka 4aad
## Xadka Adeegsiga Xeerka

1. Xeerkan waxaa loo addeegsanayaa qof kasta oo u dhashay somaliland, oo jooga dalka dibeddiisa ama gudihiisa .
2. Qofka kasta oo ajenabi ah oo dalka ku jooga si sharci ah.
3. Dhammaan shirkadaha iyo haya'daha ajenabiga ah ee ka shaqeeya dalka gudihiisa, kana diiwaangashan.

## QAYBTA 2AAD

## MAMNUUCID IYO DEMBIYO

### Qoddobka 5aad

### Hab-dhaqanka Reebban

1. Marka laga reebo tilmaamaha qoddobka 8aad ee xeerkan waxaa reebban in qofna:

   **b)** Adeegsado Miinada lidka dadka
   **t )** Curiyo, sameeyo, soo saaro ama farsameeyo miinada lidka dadka
   **j)** Helo miinada lidka dadka
   **x)** Haysto, lahaado, xafido ama kaydsado miinada lidka dadka

**kh)** Iibiyo, soo iibsado, ka ganacsado, bixiyo, qaado, ama u wareejiyo cid kale si toos ah ama dadban miinada lidka dadka.

2. Marka laga reebo tilmaamaha qoddobka 8aad ee xeerkan, waxaa reebban in qof ku caawiyo, ku dhiirigeliyo ama ku booriyo qof kale, inuu si uun ugu kaco falalka lagu reebay faqrada 1aad ee qodobkan.

## Qoddobka 6aad

## Dembiyo iyo Ciqaabo

1. Haddii aan xeerka ciqaabta guud ama xeer kale oo ciqaabeed si ka duwan u nidaamin, qof kasta oo ku kaca falalka ku xusan faqradaha qoddobka 5aad ee xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa:
   **b)** Haddii falalkaas uu galay qof ama tiro dad ah, waxaa lagu ciqaabayaa xadhig u dhexeeya hal (1) sanno ilaa saddex (3) sanno ama ganaax u dhexeeya hal milyan ilaa laba milyan shilin (1,000,000 - 2,000,000 Sh.Sl.).
   **t)** Haddii falalkaa mid ka mid ah uu ku kacay urur, hay'ad ama maamul kale oo shaqsiyad qaanuuneed leh, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya shan milyan ilaa toban milyan shilin (5,000,000 -10,000,000 Sh.Sl.).
2. Marka falalka ku xusan faqradaha qoddobka 5aad,qofku ku galay ogaanshaha ama oggolaanshaha maamulka uu ka tirsan yahay ama masuulka ka yahay, ama ku dhaco falku taxadar-daro ama dhayalsi, masuulka maamulkaa, ciqaabta ku xusan farqadda 1aad, xubinta(b) ee qodobkan,**w**axaa wada mutaysanaya maamulka iyo qofka falka ku kacay, waa marka falka lagu galay xarumaha ama dhismayaasha ama gaadiidka ama qalab kale ama goob kale oo hoos timaada awoodda maamulkaas.
3. Haddii aan xeerka ciqaabta guud ama xeer ciqaabeed oo kale si ka duwan u nidaamin, qof kasta oo ku caawiya, ku dhiirigeliya ama ku booriya ama si uun ugu fududeeyo qof kale in uu galo falalka ku xusan faqradaha qoddobka 5aad, wuxuu mudanayaa ciqaabta ku xusan faqrada 1aad, xubinta ( t ) ee qoddobkan .
4. Haddii aannu xeerku si ka duwan u sheegin, qof kasta oo ka mid ah kuwa ku xusan qoddobka 8aad ee xeerkan oo si aan sharciga waafaqsanayn ugu dhiiba, ugu wareejiya, uga iibiya qof kale si uu u adeegsado, uga ganacsado, u wareejiyo, u lahaado, u kaydsado miinada lidka dadka ama u dayaca si ay gacanta ugu geli karto qof ku gala falalka ku xusan qoddobka 5aad, wuxuu mudanayaa ciqaabta ku xusan faqrada 1aad, xubinta (b) ee qoddobkan.
5. Xukun kasta oo ku saabsan dembiyada xeerkan, waxaa wehelinaya ku wareejinta miinada marag muujinta dembiga ah xafiiska qaranka ugu xilsaaran miinada si loo burburiyo.

## Qoddobka 7aad

## Addeegsiga xuduudaha dalka ka baxsan

1. Hab dhaqanka ku xusan Qoddobka 5aad, waxa lagu dhaqayaa fal-dembiyeedka ka dhaca dibedda xuduud dhul jamhuuriyadda somaliland ee ay gaystaan, cid(Qof, xafiis, Urur,Hay'adda, shirkadda iwm.) oo degan Jamhuuuriyadda somaliland.

## Qoddobka 8aad

## Ciqaab ka Reebbid

**1.** Tilmaamaha qoddobada 5aad iyo 6aad laguma dhaqayo xubin/xubno ka tirsan ciidanka millateriga, Booliska, Garsoorka ama hay'adaha wax-ka-qabadka miinada u xilsaaran ama qof(cid) kale oo Xafiisku qoraal ugu xilsaaray muddada ay socota Hawl ay ujeeddadeedu tahay:

**b)**Baadhis fal dembiyeed miinada la xidhiidha
**t)** In uu miinada lidka dadka ka dhigo mid aan waxyeello keeni karin
**j)** Inuu u xafido si mustaqbalka loo burburiyo
**x)** In uu u qaado miinada xafiis ama xarun lagu burburiyo ama lagu kaydiyo
**kh)** In uu u fuliyo hay'adaha ama maamulada ama dadka ku xusan faqradan ee qodobka hawshooda sharcigu u xilsaaray.

**2.** Waxaa kale oo tilmaamaha qodobada 5aad iyo 6aad ku xusan ka reebban, qof kasta ama maamul kasta,**( sida Ciidamada qalabka sida )** oo xafiisku si sharci ah ugu ogalaaday in uu miinada u adeegsado sababo la xidhiidha :

- Cilmi baadhis
- amaWaxbarasho

3. Wasaaraadda Gaashaandhiga iyo hay'adaha kale ee hawlaha miinadda ka shaqeeya waxay soo codsanaysaa xaddiga miinadda ee faqradda 2aad ku xusan, waxaana u oggolaanaya xafiiska hawlaha miinadda Qaranka isla markaana xafiiska codsiga ay soo gudbisato Wasaaradda Gaashaandhiga iyo hay'adaha kale hawlaha miinaddu sidiisa ayuu ku oggolaan karaa,wax buu ka bedeli karaa,wuuna diidi karaa.

# QAYBTA 3AAD

## *WAX-KA QABASHADA MIINADA*

### Qoddobka 9aad

### Soo sheegista Miinada lidka dadka

1. Qof kasta oo ogaada miino loo haysto sifo ka baxsan sifaha qoddobka 8aad uu dhigayo, waa in uu sj degdeg ugu war geeyaa ama u ogeysiiyaa ciidanka booliska Somaliland, ciidamada qalabka ama hay'adaha wax ka qabashada miinada u xilsaaran si ay tabaabushe ugu sameeyaan soo qaadisteeda iyo burburinteeda .
2. Ciidamadda iyo hay'adaha kale ee u xilsaaran miinaddu way geli karaan meelaha looga shakiyo ama lagu ogaado inay yaalaan, miinadda ama walxaha kale ee qarxa si ay ula wareegaan una burburiyaan .
3. Ciidamadda ama cidda kale ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan waa in ay sitaan oggolaansho(warant), sharciyeysan .
4. Haddii ay ugu muuqato ciidamada ama Hay'adaha miinnada u xilsaaran inuu oggolaanshuhu (Warant) fashilinayo qabashada ama ogaanshaha miinadda ama walxaha kale ee qarxa way geli karaan, oggolaansho la'aan, meelaha lagu tuhmayo in ay miinaddu taallo.

### Qoddobka 10aad

### Burburinta miinada lidka dadka

1. Xafiisku wuxuu xaqiijinayaa burburinta:

   B) Dhammaan kaydka miinada lidka dadka ee ay mulkigeeda leedahay ama haysato jamhuuriyadda Somaliland ama xudduudkeeda dhul ku jira ama ay amarkeeda leedahay muddo aan ka badnayn (4) sanno ka dib dhaqan-galka xeerka.

   T) Dhammaan miinada lidka dadka ee ku jira goobaha miinaysan ee xuduudda dhul ee Jamhuriyadda Somaliland gudaheeda ku yaala waqtiga ugu dhaqsaha badan ee suurtagal ah oo aan ka badanayn muddo (10) sanno ka dib dhaqangalka xeerkan.

   J) Dhammaan miinada lidka dadka ee lagu soo war-geliyo ama loogu keeno inay burburiso.
2. Miinada marka la soo saaro ama la soo qabto, waa in lala socodsiiyaa xafiiska dhexe ee miinada, kaas oo marka la diiwaangeliyo lana hubiyo oggolaanaya in la burburiyo.
3. Burburinta miinada waxaa goob-joog ka noqonaya sarkaal ka tirsan ama ka wakiil ah **xafiiska** dhexe ee miinada oo aqoon u leh arrimaha miinada.
4. Miinada waa in lagu burburiyaa goob ku haboon, oo la hubiyay in aanay dadka iyo deegaanka midna dhibaato uga imanayn.

## Qoddobka 11aad

### Calaamadinta, hilaadinta iyo xafidaada Miinada

1. Dhammaan goobaha miinaysan ama lagu tuhunsan inay miino ku jirto, waa in sida ugu dhaqsaha badan loo calaamadiyo loona xayndaabo ama dayro, haddii kale waa in loo addeegsadaa hab kale oo suuragal ah, si ay dadka rayidka ahi uga war-helaan in meesha miino lidka dadku ku jirto, lana ilaaliyo inta laga safaynayo ee la burburinayo dhammaan miinada lidka dad ee goobta ku jirta.
2. Calaamaduhu ugu yaraan waa inay wafaqsanaadaan **Xeerka Nidaamiyaha (protocol)** kabka Axdiga mamnuucidda iyo xaddidaadda addeegsiga miinooyinka iyo aaladdaha kale ee isbedelka lagu sameeyey 3dii may 1996kii ee lifaaqa u ah Axdiga qaybtiisa mamnuucidda iyo xaddidaada addeegsiga noocyo cayiman oo hubka ciidamada ah oo keeni kara dhaawacyo halis ah, yeelana kara waxyeello baahsan oo cid walba gaadha.

3. Waa in la sahamiyaa, goob kasta oo miino ku duugan tahay iyo goob kasta oo miino looga shakisan yahay, iyadoo sahanku noqonayo mid sugan oo si guud oo furan ay u heli karaa cid kasta oo hawlo miino ku saabsan fulinaysa.

4. Miino kasta oo la calaamadiyo ama la soo saaro waa in goob ahaan ama miino ahaan loo xafidaa, loona diiwaangeliyaa

## Qoddobka 12aad

### Kaalmaynta Dhibbanaha Iyo Wacyigelinta Halista Miinada

1. Xafiisku waa inuu qaadaa tallaabo kasta oo suurto gal ah sidii uu ugu fidin lahaa daryeel caafimaad, dib-u-dejinta iyo bulsho dib ugu celin dhibanayaasha miinadu waxyeellaysay.
2. Xafiisku waa in uu mar kasta ka wacyigeliyaa dadka rayidka ah sidii ay ugu noolaadaan degaannada miinadu ku jirto iyo sidii ay uga digtoonadaan khataraha kaga soo fool yeelan karta miinada iyaga iyo xoolahooda, si ku wajahan qorshaha iyo siyaasaadaha qaran ee miinada.
3. Xafiisku waa in uu baadhaa shilalka waxyeelada gaystay ee miinada, sababaha ay ku dhaceen, haddii cidi masuuliyadeeda leedahay waa in uu si xeerkan waafaqsan, dhibbanaha ugu raadiyaa daryeel caafimaad iyo cawil –celin ama mag-dhaw ku haboon oo Shareecada Islaamka waafaqsan.
4. Xafiisku wuxuu hubinayaa inay hawl-waddeenada wadaniga ah ee ka hawgala hay'adaha miinada ee ku waxyeeloobay hawl miino ka helaan hay'adahooda daryeelka caafimaad , mag-dhaw iyo dib u dhaqangelin xaaladooda ku habboon.

# QAYBTA 4AAD

## LA SOCOD IYO DABAGAL

### *Qoddobka 13aad*

### *La socodka wadaniga ah*

Xafiisku wuxuu la soconayaa dhaqan-gelinta Xeerkan iyo axdiga lagu dhaqangeliyay, isagoo kormeer sugan ku samaynaya hawl kasta oo hoos timaada.

### Qoddobka14aad

### Guddiyo Xaqiiqo-raadin

1. Guddiyada xaqiiqo-raadiska ah ee caalamiga ahi dalka way iman karaan, waxaase waajib ah inay marka hore xafiiska ka helaan ogolaansho si ay hawl-gallo xaqiiqo raadis ah ka fuliyaan dhulka J/Somaliland,una hubiyaan in ku dhaqanka Xeerkani sidiisa u fulay.
2. Xafiisku waa inuu u fududeeyaa guddiyaddaa xaqiiqo-raadiska ah, hawlahooda isaga oo tallaabooyinka qaadaya
    - Tallaabooyinka loo baahan yahay ka qaadaya soo dhoweynta, gaadiidka iyo Hoyataanka xubnaha guddida
    - Xaqiijinaya nabad-gelyadda guddida ilaa xadka ugu sarreeya ee suurto-gal ah muddada ay joogayaan dalka.
    - Bixinaya oggolaanshaha guddida loo siiyo inay keensadaan qalabka ay uga baahdaan macluumaad urursiga.
    - U fududaynaya guddiyada xaqiiqo-raadiska ah in ay la kulmaan dadka ay u arkaan la kulankooda in ay macluumaad hawshooda la xidhiidha ka helayaan ama u booqdaan goob kasta oo macluumaad kaga xidhan yahay.
3. Marka ay S/Land dhaqan geliso Axdigan, markaa farqaddaha ku saabsan dhismaha wufuudda xaqiiqo raadinta caalamiga ah ee ku xusan qodobka 8aad ee Axdigu way laasimayaan.

4. Guddiyada xaqiiqo raadiska ah uma bannaana inay ku xad gudbaan madaxbannanida J/Somaliland.

### *Qoddobka 15aad*

### *Warbiximaha Xafiiska Dhexe ee miinada*

Xafiisku wuxuu uga war-bixinayaa Baarlamaanka sannadkiiba hal mar geeddi-socodka lagu dhaqan-gelinayo xeerkan iyo xaaladda guud ee hawlaha miinada dalka, taas oo xambaarsan xogo faahfaahsan oo ku saabsan:

1. Tirada guud ee dhammaan miinada lidka dadka ee dalka ku jirta, miinada la soo saaray, miinada la burburiyay, miinada la kaydiyey ee ay mulkiday Jamhuriyadda Somaliland, goobaha miinaysan, sida wax looga qabtay, khasaaraha ay gaysatay iyo macluumaad kasta oo kale oo la xidhiidha miinada.
2. Ilaa xadka ay suurtogasho, jiiddaha ay ku yaaliin dhammaan goobaha miinaysan ee la hubo ama loo tuhunsan yahay inay ku aasan tahay miinada lidka dadka ee geyiga J.S.L, oo ku jiraan tirada nooc kasta oo miino lidka dadka ah ee ku aasan goob kasta oo miinaysan iyo xilligii la dhigay iyo qorshaha soo saaristeeda.
3. Xaaladda barnaamijyada u degsan burburinta miinada lidka dadka oo waafaqsan xeerkan iyo Axdiga caalamiga ah, oo ay ku jiraan faahfaahinta nidaamyada loo addeegsan doono burburintooda, meelaha ay ku kala yaaliin goobaha lagu burburinayo iyo Xeerarka nabad-gelayada dad iyo deegaan ee ay tahay in lagu dhaqmo.
4. Noocyada iyo tirooyinka dhammaan miinada lidka dadka ee la burburiyey kadib, dhaqan-galka Xeerka, oo ay ku jiraan faahfaahinta tirooyinka nooc kasta oo miinada lidka dadka ah ee la burburiyey, sida waafaqsan xeerkan.
5. Sifooyinka farsamo ee nooc kasta oo miinada lidka dadka ah ee markaa gacanta ugu jirta ama ay leedahay mulkigooda jamhuuriyada Somaliland iyo noocyadda xogahaas oo fududayn kara, ugu yaraan, astaynta iyo safaynta miinada lidka dadka. Xogahaas waa in ay ku jiraan cabbirada fuyuusyadaada, xaddiga qarxiye, xaddiga birta ah, sawiro midab leh ee xogaha kale ee sahalaya miino saarka.
6. Tallaabooyinka laga qaaday si dadweynaha loogu fidiyo digniin degdeg ah oo wax ku-ool ah ee la xidhiidha dhammaan goobaha miinadu ku jirto ama lagu tuhunsan yahay iyo tallaabooyinka laga qaaday sidii dadweynaha loogu fidiyo waxbarashada halista miinada iyo kaalmaynta dhibbanayaasha miinada ee ku xusan xeerkan.

## Qoddobka 16aad

### Soo ururinta miinada la haysto

1. Xafiisku marka Xeerkani dhaqangalo wuxuu baahinayaa wargelin qoraal ah oo dadweynaha loogu sheegayo in ay ku soo xareeyaan, kuna soo sheegaan miino kasta oo ay hayaan ama og yihiin muddo saddex bilood gudahood ah.
2. Wuxuu xafiisku ku war-gelinayaa cid kasta oo ka mid ah, kuwa lagu sheegay qoddobka 8aad ee xeerkan inay soo sheegaan macluumaad sugana ka soo bixiyaan miino kasta oo ay u haystaan hay'adahaasi ama dadkaasi sabab hawshooda la xidhiidha, soona dalbadaan ruqsadda ku sheegan Xeerkan.
3. Markay dhamaato muddada ku xusan faqrada 1aad ee qoddobkan, xafiisku wuxuu isagoo kaashanaya ciidamada booliska , sahaminayaa goob kasta oo miino taal ama cid kasta oo miino haysata.
4. Xafiisku marka uu helo macluumaadka ku xusan faqrada 3aad ee qoddobkan, wuxuu isagoo raacaya qodobada baadhista, xayiraada iyo qabashada qalabka dembiga ee ku xusan xeerka habka ciqaabta baadhis, xayiraad iyo qabasho ku samaynayaan miino kasta oo la haysto oo aanu xafiisku siin ruqsada xeerkan ku xusan ama aanu haysan ciidanka qalabka sida ee qaranku

# QAYBTA 5AAD

# WARARKA IYO XOGAHA

## Qoddobka 17aad

## Helitaanka Xogaha iyo Qoraallada

1. Xafiisku wuxuu awood u leeyahay, isaga oo ogeysiin qoraal ah ugu diraya inuu qof(cid) kasta ka dalbado inuu xafiiska soo siiyo macluumaad ama dhokumentiyo uu ku cayimayo qoraalkiisa, haddii xafiisku rumaysan yahay in qofkaasi hayo xog ama qoraallo ku saabsan hawlaha Miinada.

## *Qoddobka 18aad*

## *Ku dhaqmi waa ama bixin warar been ah*

1. Qof kasta oo ka baaqsada isaga oo aan cudur-daar macquul ah u haysan inuu u hoggaansamo amar ogeysiin ah oo uu xafiisku siiyey ama isagoo ogsoon si kas ah xafiiska u siiya war been ah oo uu ku majarahabaabinayo, waxaa lagu ciqaabayaa dembiga-uu falkiisu waafaqsan yahay ee xeerka ciqaabta.

## Qoddobka 19aad

## Masuuliyad madani ah iyo magdhaw

1. Hay'adaha miinada wax ka qabtaa ma bixin karaan warbixin aan sugnayn, oo ku saabsan miinada.
2. Haddii hay'ad miinada wax ka qabataa soo saarto warbixin khaldan oo ah in goob laga dhammeeyay miinada oo aanay khatar miino lahayn goobtaasi, cid kasta oo markaa ka dib dhibaato miino ka soo gaadho, waxaa masuuliyaddeeda leh oo ka jawaabaysa khasaaraha miinadu keento hay'addii warbixinta soo saartay.
3. Hay'ad kasta oo kuwa miinada wax ka qabta ah oo goob miinaysan calaamad ku waaya ama xayndaab ama dayr dadku kaga baydho ama astaan uga digta ku samayn waaya, waxay masuul ka noqonaysaa waxyeellada miinadaasi gaysato madani ahaan.

## Qoddobka 20 aad

## Dhaqan- galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Baarlamaanku ansixiyo(Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtidda) M/weynuhuna saxeexo.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **Md. Cabdiraxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** | **Maxamed Xasan Khahin(Keyse)** |
| **Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL** | **Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada** |